



camalkee Ilaahay ugu jecel yahay? wuxuu yiri: "waa salaadoo waqtigeeda la tukado" wuxuu yiri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: " labada waalid oo baari loo noqodo" wuxuu yiri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: "jidka Ilaahay oo lagu jihaado"

Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee, wuxuu yiri: Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate: camalkee Ilaahay ugu jecel yahay? wuxuu yiri: "waa salaadoo waqtigeeda la tukado" wuxuu yiri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: " labada waalid oo baari loo noqodo" wuxuu yiri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: "jidka Ilaahay oo lagu jihaado" wuxuu yiri: intaasuu iisheegee, hadaan kordhisan lahaa wuu ii kordhin lahaa.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigaa la waydiiyey-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- camalkee Ilaahay ugu jecel yahay? waxuuna ku jawaabay: salaadda falarka ah oo waqtigeeda shareecadu xadeysey la tukado. Waxaa ku xiga, labada waalid oo loo baari noqdo loona samafalo, xaqoodan la guto, lagana daayo caasinimada. waxaa ku xiga, Jidka Ilaahay oo lagu jihaado, si kalmada Ilaahay ay u sarayso, iyadoo la difaacaayo Islaamka iyo dadkiisa, loona muujiyo shacaa`irta Islaamka, iyadoo loo hurayo nafta iyo maalkaba. Cabdullaahi Binu Mascuud- Ilaahay ha ka raali ahaadee: wuxuu yiri: intaasuu ii sheegay-Rasuulku scw-, hadaan ku dhihilahaa: maxaa ku xiga? wuu ii siyaadin lahaa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3365>

